



Tr: 13th June 2023

WAR MURTIYEED BEESHA EELAY

1. Marka hore waxaan ka tacsiiyeynaynaa dhammaan ehelada dadkii ku geeriyooday ama ku dhaawacmay xasillooni darrada ka aloosan degmada Baraawe ee caasimadda Dowlad Goboleedka Konfur Galbeed Soomaaliya. Beesha Eelay - Seddaxda genber iyo mashaai'ikhdooda waxay baaq u direysaa Dowladda Federaalka ee Soomaaliya – JFS, Dowlad Goboleedka Koonfur galbeed iyo odayaasha dhaqanka ay khuseyso inay si deg deg ah isaga kaashadaan nabadaynta xiisada xasillooni darrada ka aloosantay degmada Baraawe.
2. Qaar ka mid ah siyaasiyiinta heer federaal iyo heer Dowlad Goboleed ee beesha Eelay seddaxda genber iyo mashaai'ikhdooda, odayaasha iyo waxgaradkooda maanta oo ay taariikhdu tahay **13/06/2023** kulan ku yeesheen guriga guddoomiyihii hore ee baarlamaanka JFS Prof. Mohamed Sheikh Osman Jawaari waxay mar kale sugeen in **Sheikh Mustaf Ali Mohamed** uu yahay Gobka/Malaaqa keliya ee tolwaynaha Eelay ay ayidsan yihiin inuu matalo guud ahaan Beesha Eelay seddaxda genber iyo mashaai'ikhdooda.
3. Maamulka Koonfur Galbeed waxaan ugu baaqaynaa in uu ka daayo faragelinta, dhibaatada iyo carqaladeynta uu ku haayo Beesha Eelay - seddaxda genber iyo mashaai'ikhdooda in ay aayahooda iyo masiirka beeshooda si madax bananna uga tashadaan.
4. Waxaan ugu baaqaynaa dadka ka midka ah beesha ee dhibaatada ku haayo in ay ka waantoobaan u horseedidda dhibaataynta Beesha Eelay.

5. Kulanka waxaa kaloo baaq loogu diray dowlad goboleedka Koonfur Galbeed in musharrax Madaxwayne **Dhayow Ibrahim Adan** ka soo daayaan afduubka lagu haysto, xurriyaddiisana dib loo siiyo.
6. Dowlad goboleedka oo hadda xil haynteeda gunaanudka yahay in ay faraha la gasho dhismaha golaha maamulka deegaanka degmada Burhakaba una waddo si ka weecan habraaca maamul u sameynta maamullada deegaanka ay farahana uga qaado dadka deegaanka iyo dhaqanka ay si madax banaan maamulkooda u dhistaan.
7. Dowlad goboleedka koonfur galbeed waxan ugu baaqaynaa in deegaanka Boonkay laga joojiyo dhul-boobka iyo barakicinta shacabka deegankaas deggan.
8. Ugu dambayntii Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaan ugu baaqaynaa in ay u xilsaraan faraanna wasaradda arrimaha gudaha in ay daba gasho fulinta heshiiskii 04/02/2023 ee Baydhabo ayadoo goobjoog ka ahaayeen Madaxwaynaha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS in loo fuliyo sidii lagu heshiiyey.

DHAMAAD!